

Daryeelka Carruurta Ee Qoyska	Hagaha Kaqaybqaataha Kormeerka Firfircoon: Istiraatiijiyadaha Daryeelka Carruurta ee Loo Dhan Yahay
Qaybtan labada saacadood ah waxay buuxinaysaa shuruuda tababarka Xeerka 2 ee tababarka kormeerka. La Cusboonaysiiyay 2/2024	2 Saacadood

Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha Ka Dhalanaya

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:

DHS.Child.Care@state.mn.us

Guudmarka Casharka

Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

Qaybta Nuxurka KCF: VII.B. Xaqiijinta Badbaadada

Aagga Maadada CDA: Qorshaynta deegaan waxbarasho oo badbaado ah, oo caafimaad qaba.

Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka tababarkan, kaqaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Qeex heerarka ruqsad bixinta ee Xeerka 2 aad ee Minnesota Department of Human Services (MN DHS, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota) ee ku aadan kormeerka goobaha daryeelka carruurta ee qoyska.
- Baaraan dhibaatooyinka kormeerka ee lagula kulmo deegaan xannaano carruur oo loo dhan yahay.
- Hirgeli xeeladaha taageeraya jawi badbaado leh, oo loo dhan yahay oo loogu talagalay carruurta qaba dhammaan baahiyaha iyo awoodaha.

Ujeedooyinka Waxbarashada waa in dib loogu eegaa bilowga kulan kasta oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

Guudmarka Casharka

Wakhtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbaridda
10 daqiiqo	Soo dhawayn iyo hordhacyo	Khudbo yar Dooda kooxda ballaaran
20 daqiiqo	Qeexista u wada dhannaanshaha daryeelka carruurta	Khudbo yar Dooda kooxda ballaaran
25 daqiiqo	Dhibaatooyinka deegaanka iyo xeeladaha badbaadada	Howlaha dib u milicsiga shakhsi ahaaneed Lammaanin iyo wax wadaagis Hawsha koox yar
10 daqiiqo	Fahmidda arrimaha khatarta iyo sheegista xadgudubka iyo dayacaadda	Khudbo yar
20 daqiiqo	Taageerista carruurta qabta baahiyaha daryeelka caafimaad	Shaqada gaarka ah Dooda kooxda ballaaran
25 daqiiqo	Wakhtiyada cuntada, hurdada, iyo badbaadada bannaanka	Hawsha koox yar
10 daqiiqo	Soo xiritaanka	Dib-u-eegista ujeedooyinka Milicsiga shakhsi ahaaneed

Supervision Definitions

MN Rule 2 for Family Child Care	Best Practice: Caring for our Children
Minnesota DHS Rule 2 (9502.0315, subp. 29a) defines supervision as: "Supervision" means a caregiver being within sight or hearing of an infant, toddler, or preschooler at all times so that the caregiver is capable of intervening to protect the health and safety of the child. For the school age child, it means a caregiver being available for assistance and care so that the child's health and safety is protected."	Caring for our Children: National Performance and Safety Standards defines best practice: "Caregivers/teachers should provide active and positive supervision of infants, toddlers, preschoolers, and school-aged children by sight and hearing at all times, including when children are resting or sleeping, eating, being diapered, or using the bathroom (as age appropriate) and when children are outdoors.

“U wada dhannaanshaha macneheedu waa in cunug kasta, oo naafo qaba ama aan naafo qabin, uu si buuxdo ugu lug yeelan karo bulshadiisa waxbarashada uuna ku dareemo inuu ka tirsan yahay (Moses, 2021).”

Liisgaree dhibaatooyinka kormeerka iyo istiraatiijiyadaha badbaadada ee aad samayn doonto si aad u meelayso baahiyaha carruurta.

DHIBAATOYINKA KORMEERKA	FIKRAHA ISTIRAATIJIYADDA

Diiradda saar istiraatiijiyadaha kor u qaadaya marin-u-helka, xaqiiji badbaadada, oo carruurta u suurtageli inay si buuxda ugala qaybgalaan asxaabtooda.

Yoolka Badbaadada	Tallaabada ama La Qabsiga Loo Baahan Yahay	Taariikhda La Dhammeeyay

Maareynta Xaaladaha Degdegga ah

Dhammaan barnaamijyada u adeega carruurta yaryar waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan qorshe ku aadan u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ah oo ay ku maareeyaan xaaladaha degdegga ah. Marka cunug qaba baahiyo caafimaad oo dabadheer uu ku jiro barnaamijkaaga, xaqiiji in qorshahaagu uu wax ka qabanayo baahiyaha gaarka ah ee cunugga.

- La hadal waalidiinta cunugga si ay u qorsheeyaan xaalad caafimaad oo degdeg ah.
- Faham waxa keeni karo dhibaato iyo inta jeer ee ay dhibaato dhici karto.
- Baro calaamadaha laga fiiriyo dhibaataada ka hor, inta ay socoto, iyo kadib. Mararka qaarkood waxaa jira isbeddelo ku yimaada habdhaqanka, heerka hawsha, ama calaamadaha digniinta ah.
- Faham habraacyada degdegga ah ee gaarka ah ee la raaco (sida, gargaarka koowaad, CPR, siinta daawada)
- Ogoow marka aad u baahan tahay inaad wacato caawimo dheeraad ah.

Bixiyaasha daryeelka carruurta ee qoyska waxaa looga baahan yahay inay sanad walba dib u eegaan qorshahooda u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ah ee daryeelka carruurta ee qoyska. Badanaa dib u milicso qorshahaaga u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ah oo ku dhaqan inaad barnaamijkaaga ku qiimayso goobo badan iyadoo carruur badan ay joogaan. Sidee si degdeg ah uga bixi doontaa barnaamijka? Sidee u rari doontaa carruurta oo dhan, oo ay ku jiraan carruurta aan socon karin, carruurta qabta baahiyaha jireed ama garaadka, ama isticmaala aaladaha caawinta ah? Helitaanka qorshe u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ah waa mid aad muhiim u ah marka daryeel bixiye beddel ah uu daryelayo carruurta. Waa in goor hore loo sii sheego meesha ay ku taasho meel kasta oo laga baxo iyo waxa qorshuhu yahay si carruurta oo dhan loo saaro oo ay ku jiraan kuwa aan socon karin ama isticmaala aaladaha caawinta.

Milicsiga Koorsada ee Ugu Dambeeya

Qor labo istiraatiijiyadood oo aad ka baratay ama aad xusuusatay oo ku saabsan kormeerka ama carruurta naafada ah ama qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka:

1.

2.

Qor labo istiraatiijiyadood oo aad hirgelin doonto berri oo taageeri doona daryeelka carruurta ee loo dhan yahay:

1.

2.

Ilaha

Liinkiyada Shati-bixinta iyo Qawaaniinta

- [Xeer 2 ee MN ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)
- [Qawaaniinta Minnesota, Cutubka 142B – Xeerka Shati-siinta Adeegyada Aadanaha](#)
- [Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shatiga Leh – Macluumaadka iyo Foomamka](#)
 - [Siyaasadda Soo Sheegista Waajibka ah ee Si Xun Ula Dhaqanka Carruurta Yaryar](#)
 - [Amarka Qaabka Kale ee Ilmaha Loo Seexinayo](#)

Ilaha Caafimaadka iyo Badbaadada

- [Bogga Ilaha Caafimaadka Dhimirka ee Dadka Qaangaarka ah ee DHS](#)
- [Jooji Hadda!](#)

Ilaha Xirfadeed

- [Xogta Xarunta Daryeelka Carruurta Loo Dhan Yahay](#)
 - [Muuqaalka Hordhaca ah ee CICC](#)
- [Help Me Grow MN](#)
- [Caring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Qaranka](#)
 - [3.5 Qorshayaasha Daryeelka iyo La Qabsiyada](#)
- [Xeerka Anshaxa ee National Association for the Education of Young Children \(NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar\) iyo Bayaanka Ballanqaadka](#)

[Hagaha Luqadda Loo Dhan Yahay ee Ururka Cilmi-nafsiga Mareykanka](#)